



Classification: Official
Publications approval reference: C1321

Tallaalka COVID-19 waa la heli karaa, waana xaqaaga in lagaa ilaaliyo cudurada faafa

Tallaalka COVID-19 wuxuu si lacag la'aan ah u heli karaa qof walba oo ku nool UK Arintani waxaa ku jira dhammaan dadka soogalootiga ah.

Malaayiin dad ah oo ku nool UK ayaa qaatey tallaalkooda COVID-19 Waa mid badbaado leh talaalkana kuma ay jiraan wax ka sameysan xayawaanka amaba dhibaato leh. Waa wadada ugu wanaagsan ee looga hortagi karo u dhimashada ama si xun ugu jirashada COVID-19.

Uma baahnid in aad leedahay Dhakhtar Cudurada Guud ama lambar NHS ah si aad u hesho tallaalka COVID-19

Haddii aadan laheyn lambar NHS ah waxaad la xiriiri kartaa xarunta Dhakhtarkaaga Cudurada Guud si aad u qabanqaabiso tallaalka ama aad u xaadirtid xarun COVID-19 oo ballan la'aan lagu tago

Haddii aad leedahay lambarka NHS, marka laguugu yeero tallaalkaaga, waxaan kugu dhiirigelineynaa in aad xaadirtid.

Si lagaaga caawiyo in aad go'aansato waxa kuugu fiican una fiican qof walba oo kula nool, waxaan ku siin doonaa macluumaad ku saabsan tallaalka COVID-19, waxaadna wax ka weydiin kartaa shaqaalaha caafimaadka.

Marna laguguma khasbi doono in aad qaadatid tallaalka COVID-19 **saameyna kuma yeelaneyso** magangelyo raadis ama qaxootinimo.

Looma baahna hubinta soo gelitaanka dalka ah si aad baaris u sameysid, lagu daaweeyo ama lagu siiyo tallaalka COVID-19.

Si loo helo ilaalinta ugu wanaagsan ee COVID-19 **waxaad caadi ahaan u baahan tahay in aad labo qaadasho** oo tallaalka COVID-19 ah qadatid.

Marka lagu tallaalo waxaa lagu siin doonaa kaar ay ku yaallaan macluumaadka tallaalkaaga, haddii aad awoodid, kaarkan u qaado markaad aadeysid qaadashadaada labaad. Haddii aan kaarkan lagu siin, fadllan weydii in mid lagu siiyo.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 oo ku qoran af Ingiriis iyo luqadaha kale ka akhrin kartaa:

- [COVID-19 guide for older adults](#)
- [NHS England COVID-19 vaccination communication materials](#)
- [COVID-19 vaccination for women of childbearing age, pregnant, planning a pregnancy or breastfeeding](#)
- [COVID-19 easy read resources](#)
- [Doctors of the World UK COVID-19 vaccination information](#)

Ma iska diiwaangelin karaa Dhakhtar Cudurada Guud ?

Qof kasta oo ku nool UK waxaa uu dooran karaa in uu iska diiwaangeliyo Dhakhtar Cudurada Guud. Dhakhtarkaaga Cudurada Guud ayaa kaa caawin kara in aad heshid adeegyada caafimaadka.

Waxaa suurtagal ah in lagu weydiiyo caddeynta cinwaankaaga iyo aqoonsigaaga.

Haddii aadan haysan caddeynta cinwaankaaga iyo aqoonsigaaga, u sheeg in aadan haysanin. Weli waad iska diiwaangelin kartaa Dhakhtar Cudurada Guud.

Haddii aad haysatid caddeynta cinwaankaaga iyo aqoonsigaaga, iskuday in aad keento haddii aad awoodid.

Macluumaadka uu dhakhtarka ka hayo adiga iyo caafimaadkaaga waa mid **qarsoodi ah**.

Waxaad waraaqdan tusi kartaa xarunta Dhakhtar Cudurada Guud marka aad is diiwaangelineyso, haddii ay taasi ku caawineyso.

Wixii caawinaad dheeraad ah si aad u hesho ama aad isaga diiwaangeliso Dhakhtar Cudurada Guud, la hadal shaqaalaha guriyeynta ama wac 0300 311 2233. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa [NHS website](#) iyo [GP access cards](#).

Mahadsanid



Dr Nikki Kanani

Deputy SRO, COVID-19 Vaccination

Deployment Programme

Medical Director of Primary Care

NHS England and NHS Improvement

This letter is translated into Somali.

This letter is also available in English and translated into Arabic, Bengali, Brazilian Portuguese, Bulgarian, Chinese, Czech, Estonian, Farsi, Greek, Gujarati, Hindi, Latvian, Lithuanian, Punjabi, Polish, Romanian, Romani, Russian, Spanish, Turkish, Twi, Ukrainian and Urdu.